Intaa markuu yidhi buu xarriiqdii ka baxay. Markaasaa ninkii soo galay. Markaasuu dhaartay. Markii Lays u dhaartaa Lays waraystay. Markii warkii La kala laastaa maskii yidhi: 'Hebel, maxaa arladiinni Kaa keenay e aad dhulkayagan ka soo doontay?' Markaasaa ninkii u sheegay oo yidhi: 'Suldaankayagii baa i yidhi, "Sannadka soo socdaa wuxuu noqon doono ka warran!", dabadeed na faalkii baa iga guuray, dabadeed na aayyahaan curraafyaynayay.' Markaasaa maskii yidhi: 'Oo jawaabtii ma heshay?' Markaasuu yidhi: 'Maya.' Markaasuu maskii yidhi: 'Oo haddaan Kuu sheego maxaad i siin?' Markaasuu yidhi: 'Waxaad doonto.' Markaasaa maskii yidhi: 'Oo haddaad ka jawaabto, suldaanku muxuu Ku siinayaa?' Markaasuu yidhi: 'Xoolo badan.' Markaasuu yidhi: 'Oo haddaan sannadka soo socdaa wuxuu noqon doono Kuu sheego, xoolaa LaGu siiyo badhkayga may keeni?' Markaasuu yidhi: 'Walaaxawla, maya e waan Ku wada keenayaa.' Markaasuu maskii yidhi: 'Hay wada keenin e badh na qaado badh na ii keen.' Markaasaa ninkii yidhi: 'Hawraarsan.' Markaasaa maskii yidhi: 'Suldaankii waxaad ku tidhaahdaa:

Sabaanka iman doona
Sifeeyee i dhegaysو:
Waa mid saancado jaan leh
Oo siddeedguuro Ibleys ah
Oo sawjad weer xidhanaysa
Iyo geesiyaal La sadqeeyay
Iyo soofka oo La dhacaayo
Iyo soobir haadku gigaayo
Iyo saadinaaya belaayo.
Oo rag na saadaal dirireed

markuu yidhi buu xarriiqdii ka baxay. Markaasaa ninkii soo galay. Markaasuu dhaartay. Markii **lays ku** dhaartaa **lays** waraystay. Markii warkii **la** kala laastaa maskii yidhi, "Hebel, maxaa arladiinni **caa** keenay **ee** aad dhulkayagan ka soo doontay?" Markaasaa ninkii u sheegay oo yidhi, "suldaankayagii baa i yidhi", "sannadka soo socdaa wuxuu noqon doono ka warran!", **dabadeedna** faalkii baa iga guuray, **dabadeedna** aayyahaan **curraafyaynayay.**" Markaasaa maskii yidhi, "oo jawaabtii ma heshay?" Markaasuu yidhi, "maya." Markaasuu maskii yidhi, "oo haddaan **kuu** sheego maxaad **isiin ?**

Iyo u samaysay colaad
Warmihii sawiroobay na
U soofaysay dagaal.
Sengayaasha qaraystay na
U sitaacay rogaal.
Sibraarkii qollojoobay na
U siddaysay harraad.
E haddaad seexan lahayd
Iyo haddaad suuli lahayd
Iyo haddaad seefta galka
Uga saari lahayd ba
Ciyoon baa guluf soogan
Aad siigaduu kicinaayo
Ka subxaana' allaysan
Lays ku saabinayaa.'

Markii ninkii kuhaanka ahaa geeraarkii wada maqlay buu booday oo intuu maskii u duceeyay balaw yidhi. Suxuu soo ordo ordo ba degmadii yoo shiraysa oo La leeyahay, 'Waar, muddadii dhammaatay e xagguu ninkii hebel qabtay?' oo rag leeyahay, 'Dee malaa markuu waxba garan waayay buu baxsaday!', rag na leeyahay, 'Dee, maantaa muddadii ugu dambaysa e bal ilaa galabta aan dhawrro', oo ay markaa casar gaaban tahay ayuun baa siigo La arkay. Markaasaa La yidhi: 'Waar, siigadaasu waa maxay? Bisa, nin baa soo ordayoo soo geeraaraya. Bise waa faaliyii oo jaynafay oo suudhoobay oo indhuu qadaadka ka soo jeedaan oo illayn waa nin aan toddoba casho wax dhadhdhamin e aad siduu yahay yaabto. Markaasaa La wada shaamarreeray. Markaasuu horta suldaankii sidii caadadu ahayd gacanqaad ku dhuftay. Markaasaa iyadoo dadkii dheganuugsanayoo La leeyahay, 'Tolow, nuxuu odhan?' buu geeraarkii ku dhuftay. Markaasaa dadkii yoo dhammi

sararta ka wada dillaacay oo Lagu soo booday oo La gacan qaaday. Markaasaa suldaankii yidhi: 'Kexeyoo gurigaygii geeya oo hal gool ah u qala.'

Markaasaa suldaankii rag diray oo yidhi: 'Dadka dhex maroo waxaad tidhaahdaan, "Maanta maalinta ku siddeed ah waynoo shir e nin maqnaadaa ma jiro".' Markaasaa sidii La yeelay oo maalintii maantii ku siddeed ahayd baa qabiilkii yoo dhan oo aan nin ka maqnayni soo shiray. Markaasaa suldaankii u warramay oo yidhi: 'Sebenkaa soo socdaa waa seben colaadeed e nin walbaan faraska naaxso oo hubka soo dhoweeya oo inta colaaddasu ina dhaafayso maalin walba waynoo shir!' Markaasaa sidii La yeelay oo maalin walba La soo shiray oo hubkii La diyaarsaday oo korjoog La diray oo nin waliba aqalkiisii ka go'ay. Maalintii dambaa raggii korjoogga Loo diray dhambaal soo diray oo La yidhi: 'Ka kaca, waa Layna hayaa.' Markaasaa fardii La boobay oo hubkii La gurtay. Alla! Barqo yar hadday ahayd oo xoolii foofeen baa guuto camaaryaley ihi degmadii weerar saartay, qamash! Markaasaa ilayn waa qabill digniin qabay oo diyaar ah e Lagala hoos kacay oo mindhaa colkii soo duulaa inta kaw Laga siiyay sidii baqe Loogu waday meel baas Laga tuuray.

Markii intaasuu dhacday e ay muddo yari ka dambaysay baa haddana guuto kale degmadii gashay. Markaasaa guutadii na La jebiyay. Markaasaa illayn waa seben colaadeed e gabbal dhacay iyo waa beryay ba guluf Lays geliyay. Markaasaa qabiilkii gulufkii gala ba jebiyay. Ku Alla kuu saaraa na lib helay, illayn waa qabiil Loo qaroomeeyay e.

Sannadkii baa caynkaa ku dhamaaday. Markaasaa colaaddii dadkii yoo dhan qolo walba daadduufisay qabiilkii suldaanku ahaa ma aha e.

Maalintii dambaa suldaankii qabiilkii is ugu yeedhay oo la hadlay oo ammaanay. Markii dambuu ninkii kuhaanka ahaa u yeedhay oo yidhi: ‘Ninyohow, wax wanaagsan baad samaysay anna mafsuud baan Kaa ahay. Imminka na kadinkaa geela ah iyo xeradaa adhiga ah iyo fadhdhigaa lo’da ah iyo wegenkaa fardaa ah qaado, waa abaalgud e.’ Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa farxay oo suldaankii gacan qaaday oo xoolii kaxaystay.

Markuu cabbaar xoolii waday buu ballankay maskii dhigteen xusuustay. Markaasuu xoolii soo dhex galay oo is yidhi: ‘Dee, maskii qaybtisii u gee.’ Markuu xoolii soo dhex galay buu xoolaa wanaaggoodii sidaaaaaa u eegay. Markaasaa ciriqii lexejeclada dhaqaaqay oo uu is yidhi: ‘Oo haatan ma xoolaha quruxdaa leh baad mas siinaysaa? Nacas nacas dhalay, waar, intaad bahal daallin ah xolo is ka siinayso aayar seeftaa qaad oo maska gebigiisa ba soo dil.’ Markaasuu seeftii galka kala baxay oo intuu xoolii ciidan u dhiibtay oo yidhi, ‘Ii sii kexeyya!', maskii doontay.

Intuu sii socdo ba maskii yoo halkii hurduu u yimi. Markaasuu seeftii u taagay oo is yidhi: ‘Qoorta kaga goo.’ Hadduu is yidhi, ‘Ku dhufo!’ baa maskii wuxuu dareemay mooyaane miliq yidhi yoo kayntii galay. Markaasaa seeftii halkii masku madaxa ka qaaday ku dhacday kadhi! Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa is yidhi: ‘Gacantaa

go'day! Dee, hadduu soo boodayaa widhiidhiguu laba is le'eg Kaa dhigayaa ye baxso!' Markaasuu cagaa wax ka deyay, babbabbaabbabba. Wuxuu sii ordo ba isagoo dhegodhabad ah buu xoolii iyo ciidankii yoo sii socdo gaadhey. Markaasuu xoolii cagta dhulka ugu gooyoo yidhi: 'Qixiya xoolaa!' Markaasay isagii iyo ciidankii xoolii qixiyeen. Markaasay nabad tageen.

Muddo hadduu ninkii kuhaanka ahaa gurigiisii joogay e nastay e istareexay baa niman suldaankii soo diray u yimaaddeen oo yidhaahdeen: 'Suldaankii baa noo soo kaa diray.' Markaasuu yidhi: 'Oo muxuu ii doonayaa?' Markaasay yidhaahdeen: 'Mooyi.' Markaasuu yidhi, 'mmmmmmmm', inta madaxa ruxay. Cabbaar aammus yoo feker yoo is yidhi: 'Waar tolow, maxaa suldaankii maanta na Kuu doonayaa?' yoo mar dambuu kacoo yidhi: 'Ina marsha!' Markaasuu soo raacay.

Inay soo socdaan ba suldaankii yoo shirkii fadhdhiyay u yimaaddeen. Markaasaa suldaankii farxay oo intuu kuhaankii u yeedhay buu gacan qaaday oo waraystay. Mar dambaa suldaankii yidhi: 'Hebel waxaan Kuugu yeedhay dee waa adigii kal hore ina nabad geshey e sannadku wuxuu noqon doono inoo sheegay e, bal sannadkan na ka warran.' Markaasaa ninkii faaliyaha ahaa naxay oo foororsaday. Mar dambuu yidhi: 'Suldaan, ma waxaasaad iigu yeedhdhey?' Markaasaa suldaankii yidhi: 'Haa.' Markaasuu yidhi: 'Oo suldaan, sow tii faalkii iga guuray ma aha?' Markaasaa suldaankii yidhi: 'Xaashaa Lillaa, Kaa ma guurin oo waadigii kal hore ba gartay e waxaa ha

Inay soo socdaan baa suldaankii oo shirkii fadhiyey, u yimaadeen markaasaa suldaankii farxay oo intuu kuhaankii u yeedhey buu gacan qaadey oo waraystey. Mar dambaa suldaankii yidhi hebel waxaan kuug yeedhey dee waa adigii kal hore ina nabad geshey ee sanadku wuxuu noqon doono inoo sheegey ee bal sanadkanna kawarran. Markaasaa ninkii faaliyaha ahaa naxay oo foorarsadey. Mar dambuu yidhi "suldaan ma waxaasaad iigu yeedhey markaasaa suldaankii yidhi "haa" markaasuu yidhi " oo suldaan sow tii faalkii iga guurey ma aha ? markaasaa suldaankii yidhi xaashaa lillaah kaama guurin oo waa adigii kal horeba gartay ee waxaa ha ku hadlin aan

ku hadlin aan LaGaa maqlayn e orod oo sidiid kal hore toddobo casho maqnaw oo sannadkaa soo socdaa wuxuu nogon doono ka soo warran, dee, ballan na waynoo sideennii.'

Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa talo ku caddaatay: 'Waar, maxaad yeeshaa?' Siduu halkii u fadhdhiyay e u tashanayay baa shirkii Lagu kala dareeray. Markaasaa kuhaankii halkii ku dib jiray oo siduu meeshii u kuududay waagii ku beryay.

Markii waagii beryay buu wuxuu tashado ba is yidhi: 'Waar, bal maad maskii qoomammo iyo garawshiinyo ula tagtid oo tidhaahdid, "Dee, waan Kugu ba'oo Kugu hoogay e maanta na tii yoo kalaa i haysata e iga saar!"' Sidii buu ku daastoo waa durduriyay oo maskii yoo halkii jiifuu u tegay, isagoo calaacalaya oo ooyaya oo leh: 'Dee, masyohow, si xun baan Kuu galay oo meel baan Kaaga dhacay oo waan Kugu wacad furay e ii dhaaf oo qunsurkii oo kalaan maanta na ku jira ye, dee, iga saar.' Markaasaa maskii qoslay gahgahgahgahgah oo yidhi: 'Waaryaahee waa ninka! Horta adigu taadii ridatay. Xag Allaanan ka noolaadee adigu waxba iila ma aad hadhin, ha yeesho e waxa La yidhi: "Haddaan La kala roonaan roob ma da'o." Bal, hor Ilaahay baan Kuu caawimayaa, waasaan Kula hadlayaa ye i dhegayso:

Kuhaanyow, dadkiinnaa arlada Loogu daw galay e
Idinkaa in Lays wada dihiyo "dooxa" soo rogay e
Dabkaad ololiseen uumiyaa jeex dhan buu dilay e.

lagaa aan maqleyn ee orod oo sidiid kal hore todobo casho maqnaw oo sanadkaa soo socda ka soo warran dee ballanna waa inoo sideennii.

Markaas ninkii kuhaanka ahaa talo ku caddatey waar maxaad heysaa? Siduu halkaa u fadhiyey ee u tashanayay baa shirkii lagu kala dareerey. Markaasaa kuhaankii halkii ku dib jiray oo siduu meeshii u kuududay waagii ku beryay.

Markii waagii beryey buu wuxuu tashada ba is yidhi "waar maad maskii qoomamo ugutagtid garowshiinyo ula tagtid ood tirdhaadid dee waan kugu ba'oo kugu hoogay ee maantanna tii oo kalaa i heysata ee iga saar". Sidii buu ku daastoo wuu durduriyey oo maskii oo halkii jiifuu u tagay, isagoo calaacalaya oo oynaya oo leh "Dee masyohow sixun baan kuu galey oo meel baan kaaga dhacey oo waan kugu wacad furay ee ii dhaaf qunsurkii oo kalaa maantana ku jira ee dee iga saar". Markaasaa maskii qoslay gahgahgahgahgah oo yidhi "Waarr yaahnee waa ninka ! horta adigu taadii ridatay xag Allaan ka noolaadee adigu waxba iila ma aad hadhin ha yeshee waxa la yidhi " Haddaan la kala roonaanin roob ma da'o. Bal hor Ilaahay baan kuu caawimayaa ee waa saan Kula hadlalayaye i dhegeyso:

Kuhaanyow, dadkiinnaa arlada loogu daw galay, ee Idinkaa in lays wada dihiyo "dooha" soo rogay ee dabkaad ololiseen oomiyaa jeex dhan buu dhiley ee

<p>Markaad dagantiiin baad naf iyo daawo jeceshiin e Ninkays daakhishaan maalintaad dagalsantiin baaho Dacfaalkiinna goortaa heshaan u ma danaysaan e.</p>	<p>Markaad dagan tiiin baad naf iyo daawo jecshiin ee ninkays daakhishaan maalintaad dagaalsantiin baaxo Dacfaalkiinna goortaa heshaan uma danaysaan ee</p>
<p>Adna dumisay wacadkaad gashiyo daanyadii hore e Dibindaabyo bani Aadan baa dunida aafayn e Dibnaha waxaad ka leeday qalbiga Kaa ma daarrana e.</p>	<p>Adigana dumisay wacadka aad gashay iyo dhaanyadii hore ee dibindaabyo banii-aadan baa dunida aafayn ee dibnaha waxaad ka leedahay qalbiga kaa ma saarna</p>
<p>Goortaan adoo diiq ku jira dabinkii Kaa saaray Ee aan abaal door ah iyo derejo eegaayay Waa taan damiinyow magliga daaban Kaa helay e.</p>	<p>Goortaan adiga oo diiq ku jira dabinkii kaa saaray ee aan abaal door ah iyo derejo eegaayey Waa taan dammuin yahow magliga daaban kaa helay e.</p>
<p>Digtii seefta iyo siigadii daartay madaxayga Diidmadaan baxsaday boodadaan dibowga jiidaayay Dalambaabbigii bay dhogi dam i yidhaahdeen e.</p>	<p>Dhigtii seefta iyo sheekadii gaartay madaxayga Diidmadaan baxsaday boodada aan uga jiidaayay Dalambaabbigii bay dhegihii dam i yidhaahdeen ee</p>
<p>Ilmadan dhibiq leh diiftiyo baryadan dhamaqday jiidhkayga Waa waxa markii hore i dagay docogintaa jaan e Maantaan digniin qabo inaan dheeexo hay filin e Dalluun buu ku dhacay aamminkaad iga dalbaysaa ye.</p>	<p>Ilmadan dhibiq leh diifta iyo baryadan dhamaqday jiidhkayga waa waxa markii hore i dagay docog intaa jaan e Maantaan digniin qabo inaan dheeexo hay filin e Dal uun buu ku dhacay aamminka aad iga dalbaysaaye</p>
<p>Dar Allaan wax Kuu odhanayaa daallin baad tahay e Dhaaxaad nin deys iyo agoon dulintay shaallee ye Malahay dakano aad gashiyo deyn horaad bixinaysaa</p>	<p>Dar Alle aan wax kuu odhanayaa daalin baad tahay ee dhaaxaad nin deys iyo agoon dulintay shalleeye malahay dakano aad gashiyo deyn horaad bixinaysaa</p>

Suldaankii Ku soo diray abaar diirataa dhici dheh
Dixida iyo maajeenta iyo duurku way madhan dheh
Duudda iyo qaar baa engegi damasha waaweyn dheh
Durdurka iyo laaskiyo buqdiyo dooxyadaa gudhi dheh
Dalaskiyo saboolkoo dhan iyo duunyadaa socon dheh
Daan-dheerta geeliyo idaa deynlan baa hadhi dheh
Rag nininkii dadaalaa se waa doogi karayaan dheh.

Markaasaa kuhaankii farxay oo kala batay oo is labarrogay oo yidhi: 'Dee haatan masyow wixii hore e aan Kugu sameeyay na waan is ogaa, maanta abaalka aad ii gashay na waan arkayaa. Waxasaad igu ogaataa wixii hore e aan Kugu sameeyay Kuu celin maayo. Waxa Lay siiyo maanta na waan Kuu wada keenayaa sidaa igu ogow.' Markaasaa maskii yidhi: 'Bal, anigu wuxuun baan eegi doonaa.' Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa is dhigay. Inuu sii ordo ba shirkii buu yimi yoo maansadii buu ku dhuftay. Markuu dhammeeyaa Lagu soo booday oo mindhaa farxad baa dhulkii ba Laga gooyay. Markaasaa suldaankii yoo faraxsani na soo kacay oo gacan qaaday oo madaxa u tuntumay oo u duceeyay. Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa La gelbiyay oo Loo dabbaal degay. Maantii dambaa suldaankii qabiilkii shiriyay oo yidhi: 'Seben abaar aa Laynoo sheegay oo soo socda e waa inaad nin walbaan wax u sii dhigataa.' Markaasaa nin waliba wixii soor ahaa ye dhigmayay intuu raar u sameeyay ku xidhixidhay.

Suldaankii **ku** soo diray abaar diirataa dhici dheh Dixida iyo maajeenta iyo duurku way madhan dheh Duudda iyo qaar baa engegi damasha waaweyn dheh Durdurka iyo **laaska iyo buqda** iyo dooxyadaa gudhi leh **Dalaska iyo saboolka** oo dhan iyo duunyadaa socon dheh Daan-dheerta **geel iyo** idaa deynlan baa hadhi dheh Rag nininkii dadaalaa se waa doogi karayaan dheh

Markaasaa kuhaankii...

...oo yidhi: 'Seben abaar aa **la inoo** sheegay oo soo socda e waa inaad nin **walbaa** wax u sii dhigataa.' Markaasaa nin waliba wixii soor ahaa **ee** dhigmayay intuu raar u sameeyay ku xidhixidhay.

Bilo hadday ka dambeeyeen baa horta durba abaartii bilowday oo dayrtii La waayay oo gugii xigay baaqsaday oo horta markaasaa dhulkii yoo dhan meel walba siigo ka duushay oo dhulkii xaalufay oo dhirtii qallashay oo dhadhiimii engegeen oo ceel wiyeer mooyi ye horta biya-yarood oo dhammii gudhay; markaasaa xoolii na horta nugulkii iyo geeslahadii yoo dhammi socdeen oo mindhaa daan-dheer geel mooyaane wax xoolo sheegta La waayay. Markaasaa dadkii kale illayn dad abaarta ku talo galay ma aha e iyaga iyo xoolohoodii ba shuf yidhaahdeen, suldaankii iyo qoladiisii na wixii ay kaydsadeen la soo bexeen oo sebenkii ku dhaafeen.

Maantii dambaa suldaankii ninkii kuhaanka ahaa u yeedhay oo maanta na xoolo badan buu siiyay. Markaasaa kuhaankii xoolii kaxaystay isagoo faraxsan. Jidka hadduu sii socday buu waxay maskii ku ballameen xusuustay. Markaasuu intuu xoolii joojiyay meel fadhiistay oo dhulka xarriiqay. Inuu halkii fadhdhiyo oo fekero fekero ba markii dambuun buu xoolii yoo halkeer oo kale daaqaya sidaa u eegay. Markaasaa illayn lexejeclo waa suun khaatir ah e cadkii lexejeclada dhaqaaqay. Mar uun buu is yidhi: 'Oo ma xoolahaas baad mas geed hoosti is ka jiifa haatan u geynaysaa afka uga gelinaysaa? Nacas nacas dhalay!' Markaasuu haddana is qabtay oo is yidhi: 'Oo hee dheh, illayn waa taa maskii ballanteen, ballandarro na waa diin-darro. Maxaad yeeshaa?' Markaasuu is yidhi: 'Allaylee waxaad yeeshaa ha ba ku noqon e geelaagaa iyo xoolahaaga is ka kaxayso!'

Bilo **haddii ay** ka dambeeyeen baa horta durba abaartii bilowday oo dayrtii **la** waayay oo gugii xigay baaqsaday oo horta markaasaa dhulkii **oo** dhan meel walba siigo ka duushay oo dhulkii xaalufay oo dhirtii qallashay oo dhadhiimii engegeen oo ceel wiyeer mooyi **ye** horta biyo-yarood oo dhammii gudhay; markaasaa xoolii na horta nugulkii iyo geeslahadii **oo** dhammi socdeen oo mindhaa daan-dheer geel **mooyaane** wax xoolo sheegta **la** waayay. Markaasaa dadkii kale illayn dad abaarta ku tala galay ma aha e iyaga iyo xoolohoodii ba shuf yidhaahdeen, suldaankii iyo qoladiisii na wixii ay kaydsadeen la soo bexeen oo sebenkii ku dhaafeen.

Maalintii dambaa suldaankii ninkii kuhaanka ahaa u yeedhay oo **maantana** xoolo badan buu siiyay. Markaasaa kuhaankii xoolii kaxaystay isagoo faraxsan. Jidka hadduu sii socday buu waxay maskii ku ballameen xusuustay. Markaasuu intuu xoolii joojiyay meel fadhiistay oo dhulkii xarriiqay. Inuu halkii **fadhiyo** oo fekero fekero ba markii dambuun buu xoolii **oo** halkeer oo kale daaqaya sidaa u eegay. Markaasaa illayn lexejeclo waa **sun** khaatir ah **ee** cadkii lexejeclada dhaqaaqay. Mar uun buu is yidhi: "Oo ma xoolahaas baad mas geed **hoostii** is ka jiifa haatan u geynaysaa afka uga gelinaysaa ? Nacas nacas dhalay!" Markaasuu haddana is qabtay oo is yidhi: 'Oo hee dheh, illayn waa taa maskii ballanteen, **ballandarrona** waa diin-darro. Maxaad yeeshaa?' Markaasuu is yidhi: 'allaylee waxaad yeeshaa **haba** ku noqon ee geelaagaa iyo

Markaasuu xoolihiisii is ka kaxaystay oo maskii ku ballan baajiyay.

Maalintii dambaa isagoo gurigiisii jooga oo abaartii na sidii u kilkilaasayso rag suldaankii soo diray ninkii kuhaanka ahaa u yimaaddeen oo ku yidhaahdeen: 'Suldaankii wuxuu ku yidhi, "Dhaqso ii soo gaadh".' Markaasuu kuhaankii inta naxay is yidhi: 'Tolow, muxuu maanta na Kuugu yeedhayaa?' Markii dambuu illayn suldaankii amarkiisa diidi kari maayo e nimankii raacay.

Inay sii socdaan ba shirkii yoo suldaankii fadhdhiyaa bay tageen. Markaasay suldaankii gacan qaadeen. Markay fadhiisteen e warkii La kala laastay baa suldaankii kuhaankii ku yidhi: 'Hebel, waxaan Kuugu yeedhay wax had iyo goor adiga na Kuu fudud annaga na nagu culus.' Markaasaa kuhaankii naxay oo yidhi: 'Oo waa maxay, suldaan?' Markaasaa suldaankii yidhi: 'Horta sannadkan iyo sannadkii hore e xumaa labada ba adaa inaga saaray. Dadkii kale na colaaddii hore iyo abaartan aan mid na Looga digin baa madhiyay. Innaga na waa taas oo dad iyo duunyo toona inaga ma afqudhmin. Mahaddaa na adiyo Ilaah baa leh. Bal se maanta na waxaannu Kaa doonaynaa, dee, inaad sebenka soo socda ka warantaa.' 'Ka warrantaa yaa?' Bise kuhaankii baa naxdintuu naxay cirkaa is ku shareeray oo dhulka is ku dhuftay oo suuxay. Markaasay suldaankii intay cadho dag ka tidhi jeedal kula soo kacay oo yidhi: 'Waxaasuun baa markaan xukun siiyo ba cadhooda oo xanaaqa!' Markaasaa dadkii ag joogay ka qabtay. Markaasaa suldaankii intuu is ka dhaqaaqay yidhi: 'Ninkaa xun waxaa

xoolahaaga is ka kaxayso!" Markaasuu xoolihiisii iska kaxaystay oo maskii ku ballan baajiyay.

Maalintii dambaa isagoo gurigiisii jooga oo **abaartiina** sidii u kilkilaasayso rag suldaankii soo diray **ninkii** kuhaanka ahaa u yimaaddeen oo ku yidhaahdeen: 'Suldaankii wuxuu ku yidhi,: "Dhaqso ii soo gaadh"'. Markaasuu kuhaankii inta naxay is yidhi: 'Tolow, muxuu **maantana kuugu** yeedhayaa ?' Markii dambuu illayn suldaankii amarkiisa diidi kari maayo e nimankii raacay.

In ay sii **socdaanba** shirkii **oo** suldaankii fadhdhiyaa bay tageen. Markaasay suldaankii gacan qaadeen. Markay fadhiisteen **ee** warkii **la** kala laastay baa suldaankii kuhaankii ku yidhi: 'Hebel, waxaan **kuugu** yeedhay wax had iyo goor **adigana** kuu fudud

tidhaahdaan markuu tooso, "Haddaanad waxaan Ku weydiiyay saddex casho iigaga soo jawaabin seeftaasaa Ku leh".'

Wax ninkii kuhaanka ahaa La dul joogo ba markii dambuu miyirsaday. Markaasaa hadalkii suldaanka Loo sheegay. Markaasaa talo ku caddaatay oo uu is yidhi: 'Waar, bal maskii na weji aad kula noqotid ma haysid; haddaanad waxaa LaGu weydiiyay ka jawaabin na waa LaGu dilayaa. Waar maxaad yeeshaa?' Markaasuu is yidhi: 'Tolow, maskii haddaad ku noqoto muxuu Ku odhan? Dee, wax kasta ha Ku yidhaahdo e ma wax Kuu dhaamaad haysataa? Allaylee isagii isaga tag.' Halkaasuu ka durduriyay oo maskii buu u tegay. Markaasaa maskii qoslay oo yidhi: 'Waar, hebel, maanta na ma adigii baa meesha maraya?' Markaasuu yidhi: 'Haa.' Markaasuu maskii yidhi: 'Maxaad dooni?' Markaasuu yidhi: 'Su'aashaan Ku weydiin jiraa maanta na Lay weydiiyay.' Markaasaa maskii yidhi:

'Suldaankii Ku soo diray, Cirkaa soo
daruur celin dheh
Dhaaxuu dagiignaa hadduu Dirir
cusboonayn dheh
Habeyn doorki hadhay buu hillaac dilig
ka soo siin dheh
Daydada biyaa badani waa di'i sideedii
dheh
Dalkoo idili waa xaalufee doollin baa
mari dheh
Dalandoolkha xoolaa ku lumay doogsin
bay heli dheh
Dooxyadan nabaadguuray baa daadku
mulacyayn dheh
Doog baa ka bixi ayyahaa degi tijiinneen
dheh

Durgufkiyo dharkii hawsha way daadin
idilkood dheh
Xariirtii la duuddubay bay dam isku
soo siin dheh
Dabqaadkay ka soo bixin huddiyo
dalowyadii jaan dheh
Darmaday ku wagaciin qolkii wada
dugsoona dheh
Raggoodii da' furay baa markuu diiro
soo geli dheh
Goortuu degaa baa anfoco damac leh loo
geyn dheh
Diihaalqab ma aha ee siduu doono waw
cuni dheh
Durduuraa la odhan qawl yar oo
debescan dhawr jeer dheh

<p>Duunyada wixii soo hadhaa darari shaallee dheh</p> <p>Qoryaa La dayrshaa guryaa daaro le'ekayn dheh</p> <p>Durgufkiyo dharkii hawsha way daadin idilkood dheh</p> <p>Xariirtii La duuddubay bay dam is ku soo siin dheh</p> <p>Dabqaadkay ka soo bixin huddiyo dalowyadii jaan dheh</p> <p>Darmaday ku wagacsiin qolkii wada dugsoonaa dheh</p> <p>Raggoodii da' furay baa markuu diiro soo geli dheh</p> <p>Goortuu degaa baa anfoco damac leh Loo geyn dheh</p> <p>Diihaalqab ma aha e siduu doono waw cuni dheh</p> <p>Durduuraa La odhan qawl yar oo debecsan dhawr jeer dheh</p> <p>Dahabooyinkoodaa adeeg dooni baallaha dheh</p> <p>Dulmaraanmarkaa caashiqii duugay soo kici dheh</p> <p>Damaashaadka loolkay ku dhali danabyo khayreed dheh</p> <p>Doobka iyo yeridkaa hablaa tay damcaan togan dheh</p> <p>Markaasaa dabbaaldeg iyo sacab Loogu derejbyn dheh</p> <p>Diintiyo salaaddana ninkii doonayaan dhigan dheh.'</p>	<p>Dahabooyinkoodaa adeeg dooni baallaha dheh</p> <p><u>Dulmaraan markaa</u> caashiqii duugay soo kici dheh</p> <p>Damaashaadka loolkay ku dhali danabyo khayreed dheh</p> <p>Doobka iyo yeridkaa hablaa tay damcaan togan dheh</p> <p>Markaasaa dabbaaldeg iyo sacab loogu derejbyn dheh</p> <p>Diintiyo salaaddana ninkii doonayaan dhigan dheh</p>
<p>Markaasuu durdurshay oo suldaankii buu u sheegay. Markaasaa maantaa na sidii horiyo si ka daran Loo galay.</p> <p>Qoodhyaxero hadday muddo yari ka dampaysay uun baa daruur yari bari gunti ka soo kacday goor galab ah. Markaasaa La yidhi: 'Qoodhyaxero daruur baa soo kacday.' Sidii daruurtii caad yar Loo moodayay uun bay markii</p>	<p>Markaasuu durdurshay oo suldaankii buu u sheegay. Markaasaa maantana sidii horiyo si ka daran loo galay.</p> <p>Qoodhyaxero hadday muddo yari ka dampaysay uun baa daruur yari bari gunti ka soo kacday goor galab ah. Markaasaa la yidhi: 'Qoodhyaxero daruur baa soo kacday.' Sidii daruurtii caad yar loo moodayay uun bay markii</p>

xooluu soo galeen bari gunti ka hillaacday bilig! Markaasaa dadkii yoo dhammi wada farxay oo dumarkii mashxarad ku dhufteen oo maansha Alla dadkii yoo dhan deddadii ka duushay. Sidii Loo eegayay e aan waxba Laysaga fileyn uun baa La yidhi: 'Qoodyaxero daruur baa ina dul joogta.' La ye: 'Aqallada moosa oo xoolaa wixii jilicsan qaadhka gesha.' Sidii baa La yeeloy oo markii aqalladii La moosee xoolii La kala wada hagaajaa Lays ka seexseexday. Qoodhyaxero, haddii habeynkii dalool teguu barta saaray, hig! Markaasuu markuu biyo dhigay qaaday. Markaasaa xoolii La doogsineryay. Markaasay duleedka ka cabbeen. Markaasaa dadkii na dhaansaday. Markaasuu haddana markii waagii beryay mayay ku fadhiistay. Markaasuu markay barqadii ahayd ka qaaday. Markaasaa xoolii La sii daayay. Markaasaa markii roobkii afar casho da'sanaa xoolii geel iyo adhi ba dhergeen oo wixii gudhay irmaanaadeen oo dadkii caano ka dhergay.

Markaasaa markay guga badhtankiisii ahayd suldaankii qabiilkii shiriyay oo xaajooyinkii abaartii dhacay oo dhan xukumay oo dadkii wacdiyay oo kala wada saaray. Markaasuu markuu xaajooyinkii wada dhammeeyay kuhaankii u yeedhay. Markaasuu xoolo badan oo meesi walba leh siiyay.

Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa is yidhi: 'Allaylee, maskii saddexda goor qunsurka Kaa saaray ee aad mar walba ku wacad furtay maanta na ha ku wacad furin e u abaal gud oo xoolahaa LaGu siiyay oo dhan u wada gee!' Markaasuu

xooluu soo galeen bari gunti ka hillaacday bilig! Markaasaa dadkii oo dhammi wada farxay oo dumarkii mashxarad ku dhufteen oo maansha Allaah! dadkii oo dhan deddadii ka duushay. Sidii loo eegayay ee aan waxba Laysaga fileyn uun baa la yidhi: 'Qoodyaxero daruur baa ina dul joogta.' La ye: 'Aqallada moosa oo xoolaa wixii jilicsan qaadhka gesha.' Sidii baa la yeeloy oo markii aqalladii la moosee xoolii la kala wada hagaajaa la iska seexseexday. Qoodhyaxero, haddii habeynkii dalool teguu barta saaray, hig! Markaasuu markuu biyo dhigay qaaday. Markaasaa xoolii la doogsineryay. Markaasay duleedka ka cabbeen. Markaasaa dadkiina dhaansaday. Markaasuu haddana markii waagii beryay mayay ku fadhiistay. Markaasuu markay barqadii ahayd ka qaaday. Markaasaa xoolii la sii daayay. Markaasaa markii roobkii afar casho da'sanaa xoolii geel iyo adhiba dhergeen oo wixii gudhay irmaanaadeen oo dadkii caano ka dhergay.

Markaasaa markay guga badhtankiisii ahayd suldaankii qabiilkii shiriyay oo xaajooyinkii abaartii dhacay oo dhan xukumay oo dadkii wacdiyay oo kala wada saaray. Markaasuu markuu xaajooyinkii wada dhammeeyay kuhaankii u yeedhay. Markaasuu xoolo badan oo meesi walba leh siiyay.

Markaasaa ninkii kuhaanka ahaa is yidhi: "Allaylee, maskii saddexda goor qunsurka kaa saaray ee aad mar walba ku wacad furtay maantana ha ku wacad furin ee u abaal gud oo xoolahaa lagu siiyay oo dhan u wada gee!" Markaasuu

sidii yeelay oo xoolii yoo dhan buu soo wada kexeyay oo maskii u keenay. Markaasuu yidhi: 'Masyow saddex hal baan Ku idhi, mid weeye e waa taad waxa badan i caawintay ee aan anna mar walba xumaanta Kuugu abaal guday, haatan na is qoomammeeyay oo wixii maanta Lay siiyay waa kuwan e wada qaado i na saamax! Ta labaad na inaynu saaxiibnaa baan doonayaa. Ta saddexaad na, walaalkay, bal nin xidaar aad tahay ee adduunyada iyo nolosheeda iiga warran!' Markaasaa maskii yidhi: 'Horta ta saaxiibnimada weeye e dee anigu nin na la ma saaxiibo e ninkii Lay diruun baan qabtaa ama caawimaa. Ta qoomammada iyo xoolahan aad ii keentay na horta mid weeye e saamax baad iga tahay, xoolahan aad ii keentay na wayga celis e qaado. Ta dunida iyo nolosheeda na Kaaga warramay e horta duni baa jirta e nololi ma jirto. Nolosha La sheegayaa mar ba waa sida dunidu tahay. Ilahay duniduu sameeyay. Markaasuu calaamooyin badan u yeelay. Dadka na calaamooyinka dunidaa xukumaya. Hadduu sebenku seben colaadeed yahay dadku na waa wada col meel kasta ha joogo e, oo adigu ba waa adigii colaaddii dhowayd markaan Ku caawimay seefta ii soo qaatay e is yidhi, "Qoorta ka goo". Haddii sebenku abaar yahay na waa Lays wada qadinayaa yoo adigu ba waa adigii xoolii la baxsaday. Hadday barwaqaqo tahay na wax is qadinaya iyo wax is quudhaya toona arki meysid oo adigu ba waa adigan wixii LaGu siiyay oo dhan ii wada keenay. Intaas oo goor, mar walba wax sebenku Ku faray, uun baad adigu yeelaysay. Imminka iyo go'aan na horta anigu waysaga kaa warramayaa ye mas ma ihi.

sidii yeelay oo xoolii yoo dhan buu soo wada kaxeyay oo maskii u keenay. Markaasuu yidhi: "Masyow saddex hal baan ku idhi, mid weeye ee waa taad waxa badan i caawisay ee aan anna mar walba xumaanta kuugu abaal guday, haatanna is qoomammeeyay oo wixii maanta lay siiyay waa kuwan e wada qaado ina saamax! Ta labaadna inaynu saaxiibnaa baan doonayaa. Ta saddexaadna, walaalkay, bal nin xidaar aad tahay ee adduunyada iyo nolosheeda iiga warran!" Markaasaa maskii yidhi: "Horta ta saaxiibtimada weeye ee dee anigu ninna lama saaxiibo ee ninkii lay diruun baan qabtaa ama caawiyaa. Ta qoomammada iyo xoolahan aad ii keentayna horta mid weeye ee saamax baad iga tahay, xoolahan aad ii keentayna wayga celis ee qaado. Ta dunida iyo nolosheedana kaaga warramay ee horta duni baa jirta ee nololi ma jirto. Nolosha la sheegayaa marba waa sida dunidu tahay. Ilahay duniduu sameeyay. Markaasuu calaamooyin badan u yeelay. Dadkana calaamooyinka dunidaa xukumaya. Hadduu sebenku seben colaadeed yahay dadkuna waa wada col meel kasta ha joogo ee, oo adiguba waa adigii colaaddii dhowayd markaan ku caawiyay seefta ii soo qaatay ee is yidhi, "Qoorta ka goo". Haddii sebenku abaar yahayna waa lays wada qadinayaa oo adiguba waa adigaa xoolii la baxsaday. Hadday barwaqaqo tahayna wax is qadinaya iyo wax is quudhaya toona arki meysid oo adiguba waa adigan wixii lagu siiyay oo dhan ii wada keenay. Intaas oo goor, mar walba wax sebenku ku faray, uun baad adigu yeelaysay. Imminka iyo go'aanna horta

Nabsi baan ahay. Maanta ka dambaw na i arki meysid. Dee intaa iyo nabadgelyo.

anigu waysaga kaa warramayaa ee mas ma ihi. Nabsi baan ahay. Maanta ka dambawna i arki meysid. Dee intaa iyo nabadgelyo.

cidla en öde plats

bise mise eller

caynsanaa namn på omen

cunsurguuriyay att utrota något

Deddadii: qabow aad ah oo dhaxan leh

Dhurmay mumlar

Doogsineryay: xoolo biyo la doonid Ge vatten till djuren

Durgufyo Arbetskläder

Kararraxay???

Kuhaan: Faaliye Spåman

madhanaa namn på omen

Meesi: Duunyo la dhaqdo

min namn på omen

Mooreeyo ringa in

naxdinbakaylihii lätt skrämd

Qaadalka en liten hydda för svaga djur

Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal

1957 – Wargeyska Soomaaliyeed

Corriere della Somalia, No 52, 1957, Marzo 2



Wargeys-ka Sômâliyed

Bâl-ka Saddeh-âd

Wargeys-ka Somaliyed

Murti-di Todobad-ka

Dowlad-da Sômâliyed wâ lô ga yerey

Warqâd û usô direy Rais alwasara-ha Kwame Nkruma
mudane 'Abdullâhi 'Isse.

Wahâ uga yimid Rais al Wasara-ha Dowlad-da Sômâliyed warqâd yernin ah hagga Rais al wasara-ha Heb-ta Dahab-ka, Kwame Nkruma û leyahay wahân kû dalbanaya Scir-ka laga dhigayo Accra tan iyo 2 ilâ 10 marzo, ê ah dabbâl degga gâridtan-ka horriyad-da Heb-ta Dahab-ka, ô yelan dônta maga'a la yirahdo Ghana.

wân dhalshay ô mîl-shî yalla. Wahay ummaleyen inû labo beri yillay mîl-sha. Haddaynan arkin wâ dhiman laha. Wahay u sô qayliyen Dhinsor, mar-kâsa wahâ ra'ay Professor Bonanni, mîl-shî bay ta-gén, wil-kî bay sô qâden ô ukenen Hâkin-ka Magálo-da Baydhabo ô isagu na mar-kîs

KU DHAWAQID-DA HORRIYAD-DA HEB-TA DAHAB-KA

Dowlad-da Sômâliyed wâ lô ga yerey

Warqâd û usô direy Rais alwasara-ha Kwame Nkruma mudane 'Abdullâhi 'Isse.

Wahâ uga yimid Rais al Wasara-ha Dowlad-da Sômâliyed warqâd yernin ah hagga Rais al wasara-ha Heb-ta Dahab-ka, Kwame Nkruma û leyahay wahân kû dalbanaya Scir-ka laga dhigayo Accra tan iyo 2 ilâ 10 marzo, ê ah dabbâl degga gâridtan-ka horriyad-da Heb-ta Dahab-ka, ô yelan dônta maga'a la yirahdo Ghana. "Wahay î tahay aniga wanâg dhab ah ô i gôni ah haddî ay ku surowdoh inâd shir-ka timadid".

Rais al wasari-hî, mudane 'Abdullâhi 'Isse wahû u jawâbey sidan:

« Dottor Kwame Nkrumah

« Rais al wasara-ha Heb-ta Dahab-ka, mahad naqa ân ka 'elinhayo yerid-da âd î gu yertey inân wah ka jôgo bil-sha dhow shir-ka horriyad-da Ghana wân ka humahay ku sô ogeysînta hawl iga badadtey iyo dal-ka ô u ka maqan yahay nin dowlad-da ka mid ah, iyo sod'al dhow ô u mid kale adayo Italiya

iyo Dowleddo-ha Ururay, ayân î suro gelin kareynin inân oggolado yerid-dâda wanâgsan.

« Sâhibbadey iyo anigu ba xâh je'leysannay wanâg-ga u dad-ka Ghana u ku heley hoggamis-kâga. Annagô Afrikan ah wahay nala tahay wanâggâsi inû yahay libin wêyn dad-kina kaliyah ma aha ê giddi Afrikan-ka kale dhashey Afrikan-ka dunida ô dhan. Anô idin-ku du'eynahaya wanâg kî u warreya bân wahân idin ka baryaya inâd oggolatan salanteyda iyo tî sahibbadey ».

--O--

Shirkad Somaliyed ba ka sameysantey Kambala

Sômâlida Kambala-da Ugandha deggeni wahêy sameysadtey Shirkad ay u gu talo galen wihî dan-tôda ah.

Shirkad-da wahâ la âsâsey 6 biil-shî sagalâd ê 1956, rag-ga ku jirâ na tirsi-gîsu wâ 55 qof.

Bil mar hâtan laga jôgo wahay Shirkad-du Kambala ka furtey dugsi laga barto ingirisi-da iyo arabi-da.

Shirkad-du wahey dhawan u 'abatey Sômâli-da deggen Afrika-da Bari ô ay u weydîsadtey kâlmo hor u ka'-êda.

Rag-ga hor so'od-ka u ah shirka-da Kambala wâ: Isma'il 'Id, Hâji 'Ali Yusuf, Mahamed Mahamud, Ahmed Shikh, Si'id Shirwa', Ma'allin Si'id, Mahamed Hâji Hassan iyo 'Ali Burayd.

Wahâ la ga guriey war Sômâli sidaha.

--O--

Wil 'Idla Laga Heley ô 'Id Yelshay

Ayan Dhoweid niman Bulisiya-da ah dûr-kî Dhinsor bay marahayen, wahay maqlêñ tâh yar; Markâs wâ firiyêñ: wahay arken 'unug yar ô dhowân dhalshay ô mîl-shî yalla.

Wahay ummaleyen inû labo beri yillay mîl-sha. Haddaynan arkin wâ dhiman laha.

Wahay u sô qayliyen Dhinsor, mar-kâsa wahâ ra'ay Professor Bonanni, mîl-shî bay tagêñ, wîl-kî bay sô qâden ô u kenen Hâkin-ka Magâlo-da Baydhabo ô isagu na mar-kîsa daqso ugu diray isbidal-ka.

Wahâ la yiri: gabbo-ha isbidal-ka ka shaqêya qof-kî ugu naharis badan ha lo dhibo. Wahâ qâdadxtay 'Addey 'Umar, ô ku dadalshay.

Wanâag-ga ay falshay wâ ku mahadinayna.

Ardo-dî Bûlo Burti mar-kay maqlen in 'unug 'idla laga helei, wahay sâbiyen wah wanâgsan: Wahay 'arûriyen 108 la'ag-ta tan Sômâli-da ah, wahay u sô diren Hafis-ka kan wargeys-ka ah. Qasad-kêdu wahû yahay 'unug-gâs kalmohîs.

Wîil-kî dhib-kâs arkay wahû heley hîyo Ilâhi sîyey iyo walâlo kalmeyey.

--o--

Wareysad dheh maray W.E. Corfitzen iyo Mohamed Fârah Siad ô ku sâbsan dhâqalo-ha waddan-kêenna

W. E. Corfitzen ô ka mid ah guddi-da la'ag-ta Dal-ka Sômâliyed wah logu qabto bâ intusan ka tegin arli-ga, waha ka werêstay jel-kayo Mohamed Fârah Siyad.

Wahû ugu warramey inû âd ralli uga noqdey hor u ka'a dal-ka, goni ahân weliba, bar-bar-ka dunyo-da iyo kân bêr-ta. Ha ba u sî darrâto weliba affarta tan sannad-dôd ê danbe. Wahû yiri tartîbo badan bâ lagu talo galay: qâr wah bâ laga sameyey, qâr na wâ la jideyey, qâr na wâ laga firsanaya.

Tartibo-ha kan qâlmo bay ka geysten, weli na wâ ka geysanayan Dawlado-ha Ururay.

Tartib-ta uga horraysa 'êlal bâ laga qodey âd u anfa'ay hôlo-ha kana yareyey dhimasho-dî, hâl-kôda no wanâjiyey ô sahley safris-kôda dibed-da ah.

Tartibo-ha kale na wahâ ka mid ah webi-ga ilalin-tîsa, dhasheg-ga sameys-kîsa si bêro-ha dal-ku ku fi'nadan.

Wahâ kalô ô ka mid ah masêgo-da ka bahdo bêro-ha dhaqâleyn-têda ô lô sâbiyey bakâro dâr ô kale ah ô laga dhisay Afgoye iyo Jamame.

Wahâ la sameyey ô dhan shaqalo-ha Sômâliyed hagar laân bu wah kaga shaqeyey mîl fi'an bâ na laga gârey.

Haddana wahû yiri mahay ila tahay in dhaqalo-ha Sômâliyed loga heli karo Dowledo-ha Ururay la'ag ku dhow 400.000 ô dôllar.

Ku heshiye sohdin-ti Rusiya iyo Irán

Sida ay shegtay wakâlad-da la yirahdo TAS. Hawl-shî ku sabsaneyd sohdin-ta u dhahaysa Rusiya iyo Irân ka la dhigasho-dêda wâ ay u dhamadtey.

Guddi laba-da qolo isugu jirtâ hâ lô direy ô ku sô waregtey labadî kun ê Km. ê sohdin-tu ay ahêyd, hadba na qolo wah la rîho ba wey hagâgtey.

Dowlad iyo dad

Biyo dôn Bulo Ahmed

Malin Ahad ah bâ wasir-ka dhaqâlo-ha mudane Hâji Fârah 'Ali 'Umar ô ay la so'dan mudaneyâl Mahamûd Janaqow iyo 'Ali Scêkh Jês, iyo Hâkin-ka jaha-da Banâdir, iyo Hâkin-ka magâlo-da Jawhar iyo nin-ka u madah ah hafis-ka haw-sha iyo dabib-ka magâlo-da bâ wahay sô dâwdêن Bûlo 'Ahmed ô ku tal bari iyo uqoyi isgal-kôda mîl ka hig-ta MAhaddeyku na lunsan mîl hawd ah ô barbar-ka bidih e webi shabêlle.

Bûla-du sida dahab-ta ah wâ godôn, waddo na wahâ u ah mid dad-kêdu au ku rideñ tî hore ê Mahaddey.

Madah-da Bula-dâ horey wahey u weydisatey wasarad-da dhaqâlo-ho in biyo marêñ lô bihio, mid qabyo ah na lô dhameys tiro hilo-da ô âd u gÂbatay na lô dhêrêyo si bêr-ta sisin-ta iyo gelley-da ihî u gu tosto.

Dan-ta wasir-ku na wahay aheyd ruh-îsu inû sô arko dan-ta bulo-da ito sida lô sameyn karo hawl-sha dad ku dônayo.

Sidâ darâddêd bâ wasir-ka iyo intî la so'odtei ba wahay lug ku maren gabal dhêr ô webi-ga jin-kîsa ku yâl, iyagô firo u leh mîl-sha iyo sameys-kî la weyddistey.

Wahâ goni ahân naga yabiye mar-kî anu sô geleyney bulo-da, hayirâd-da dad-kâsi ku jiro gûhi bâbur-ta mar-kî u maqlay bû wahû ku sô ururay mîl bannan inû arko waha dha'ay darâddêd illen wâ ku dhif arag-tî bâbur eh.

Annagî in badan ku waregney Sômâliya wahâ kediso na u ahâdey inta dad weli ka goan hor u ka'a iyada ô magaloyin-ka wawêin û âd u ga so'do.

Ma murtiyeyn karno tilmantân gÂban, anagô ân ku reyn reynin wasir-ka dhaqalo-ha Hâji Fârah 'Ali 'Umar.

Isu helqâmid-da û ugu qumay dadal-kî ay dawlad-du ugu talo gashey wanâjin-ta dad-ka, ka ma usan shakiyin inû malin iska dhigo rêr badiye hubsîno daradêd.

Sô noqod-kî Mahaddey, wasir-ku wuhû ku hakadey hera-da badariyin-ta rêr Mennonita ê mîlsha ku tal, wâ na u ammaney madah-dôdi.

Wareg-gî dhowâ ê hâkin-ka magâlo-da baydhabod iyo madah-dî ay kulmen

Hâkin-ka magâlo-da Baydhabod ê Ahmed Râge 'Abdi ah bâ malin dhaweyd wuhû ku sô waregey bûloyin-ka ka tirsan magâladîsa.

Bûlo-da Gorisane la yirahdo mar-ku tagey hâkin-ku ô û ku waregey iyada iyo war-têda ba bu wahû u yimid duq-î mîl-sha ô isagu na u ga waramey in la gu nabad qâbo bûlo-da ô ay miyiran tahai, la na bihiyo 'anshurta bêraha. Wuhû duqu hâkin-ka ogeysiye in 'êl-kî bûlo-da lô bâhan yahaî in la qodo. Wahâ ra'iyey dad-ka ka sokôw in bêr-tu na ku tôseyso. Hâkin-ku na sabab-tî dahisey 'êl-ka qodnin-kîsa bu uga waramey wahâ na u ka ballan qâdey inû u dadâlo, dabadêd na kâkin-kî wahû sô adey bûlo-da la yirahdo Tigan-Kasa Sheb.

Mîl-shân na wahû ku la kulmay dugow-dî iyo 'ulumo-dî, hawêñ-ku na wâ ay u 'arrab-dhaben, dhallin yaro-du na wâ ay u 'ayârtay wahâ na la tirihey hêso Dowlad-da amman-tÊda 'âdo-da ahâ hostîsa bu ikhyar-tî ku la haldey, wahâ na u gar sîyey salan-tîsa iyo tî hâkin-ka jaha-da. Dawr oday bâ ka hadlay gêd-kî ô ku mahad naqay hâkin-kî wahâ na ay weydisten in lô qodo 'êlal iyo waroh. Mar-kôda wahâ hadley ô la dardârmey hâkin-ka duqa la yirahdo Hussên 'Abdi Nûr iyo rag kale ô ku adkêyey 'od-kôda inû gârisyo hâkimmo-da sare ô degdeg lô ga kâlmeyo biyo yarida, wahâ ballan-qâdey in la sô diro rag farsamo leh ô firya sidî wah-lô sameyn karo.

Dabadêd-na wahû u sô 'arrâbay Baydhaboh.

Nin-ka madah ah haffis-ka ka furan Addis-Ababa ô ka tirsan mîlsha la yirahdo UNICEF, la na yirahdo magac'îsa H. Ehrenstrale, iyo Fulvio Rizzetto bâ wahey ku hoyden Baydhabo, wahâ dhaweyey hâkin-ka Jahada Hâjî Bashir Isma'il, intî ay jôgen na magâloda u wêyn Alto Juba, wahay âd u dâwaden Isbital-ka iyo dugsi-ga wêyn ê Jahada iyo dugsiyo-da kale, wahâ na ay âd u shekeysten nin-ka ka madah-a ah sida so'od-kôdu yahai iyo sidu wah tar-kôdu yahai.

Afrika wä u bar-ka sare siyasad-da u dhaheysa ummado-ha

Afrika-du bârka sare bay u tahay siyâsad-da ummado-ha u dhaheysa, wahey ku si tahay warkî dowlad-da fransis-ka ay sô jedisei ê ahâ in la gu daro dalal-ka bad-da ka shisheya suq-a gûd nimo ê Yurub.

War-ka madba'ad-da talyânigu ku ma talah tegin wahâ na lô yeley inân la 'arqaleynin kuwâ « yurubeysan », wahâ se la ga war hayâ in rayiga fransis usan dhaqâlo ku ekeyn ê u siyasad yahay.

Is kalmeyasad-ka Yurub iyo Afrika wâ wah wêyn wâ se inû horriyat ku dhalshâ.

Sida hâtan mûqadta Yurub-Afrika wâ san dulleлага rêm Yurub-ka qâr-Kôd ô dalal haysta.

Wâ dhawedto wahâ ka goay shir-ka faransis in wah horriyat u eg la sîyo Madagaskar iyo labo iyo tobâ tal ô kale ô Afrika ah ô ka mid ah Afrika-da Galbêd ê faransis-ka (wâ: Senegal, Sudan, Mausitania, Nijer, Volta-da Sare, Guinea, Heb-ta 'Aga iyo Dahomey)лага Afrikada dhehe ê faransis-ka na (wâ: Gabon, Congo ha dhehe, Ubanqui iyo Ghari).

Nâib al rais-ka Dowladaha Ururey Nixon wuhû u gâri dônâ marzo horrantêda arag-tî rasmi ah Afrika. Isagu wahû wakil ugu ahan dônâ Dawladdaha Ururey Shirka lô dhigi dôno horriyadda Heb-ta Dahab-ka ê Accra, wahâ na kale ô û marayâ Liberya iyo baldân kale.

Madah-da Dar-ta 'Ab-di wahay 'Amal qabtâ inay u yêrto sanad-kân iyo kan ku higa madah badan ô dowladaha Afrikâd ah.

Dowladaha Ururêy kale ô ay dama'san yihîn iney kalmeyân Afrika-da wali ba goni ahân dalal-ka Afrika-da ah ê dhawân qâtey horriyat-dôda.

--0--

Hakin-ka 'usub ê Huddur

Wahâ iska beddeley magâla-da Huddur hâkin-kî horey u jôgey Ahmed 'Adde Munye iyo kan 'usub ê la yirahdo Dâhir Nûr Hirsi.

Ikhyar-tî beled-ka u wayel-ka ahêd ô dhami na wâ jôgtey gobtey ku kala amar qâdanayen. Khudbadoh ba na la akhriyey.

--0--

La hadal-kî wasir-ka arrîmo-ha gud nimo

Wasir-ka arrimo-ha gûd nimo mudane Mahamud 'Abdi Nûr wahu muqâbileyey madah-da rag-ga ilâliyah hagga shaqâlo-ha Sômâli-da wahâ ay ka wada hadlen dan-ta shaqalo-ha malin shaqeys-ka ah iyo arrimo kale ô ku sâbsan hawl-shôda.

HARFA-HA

B wâ «ba» (biyo)

T wâ «ta» (timir)

J wâ «jin» (jid)

H wâ «ha» (harig)

Kh wâ «kha» (Khadîjo)

D wâ «del» (dar)

R wâ «ra» (rati)

S wâ «sin» (san)

Sh wâ «shin» (shinbir)

G wâ «ga» (gabar)

Dh wâ «dha» (dheri)

' wâ «'ain» ('ambe)

F wâ «fa» (faras)

Q wâ «qaf» (qâlin)

K wâ «kaf» (kab)

L wâ «lan» (laf)

M wâ «nun» (nabad)

N wâ «num» (nabad)

H wâ «ha» (hilib)

W wâ «wow» (webi)

Y wâ «ya» (yar)


I wâ «i» gaban (il)
U wâ «u» gaban (ul)
O wâ «o» gaban (olol)
E wâ «e» gaban (edeg)
A wâ «a» gaban (ari)
Ī wâ «î» dhêr (îb)
Ū wâ «û» dhêr (ûn)
Ō wâ «ô» dhêr (ômâr)
Ē wâ «ê» dhêr (êlo)
Ā wâ «â» dhêr (âbbe)

1960

-


Afkayaga

Hooyo



Edizioni Arte e Cultura

Mogadisho



Abēso bā sagāro ilmohēda ka hhōgtay.

Sagārodī wahhay u tagtay dhurwā gēl la jōgā.

Sūye: «Yā gēl bēlo gēlayga iga didiyay? ».

«Adēr, wā sagāro bisbislay, botin dhēr, bērkēdī hhalay abēso ka la bahhday ».

«Na bal ī gē, na bal ī gē ».

Abēsodu markay aragtay wahhay tiri:

«Arrabkaygu wā sag, wā sagāl madilōd, midka ugu yar intānan sag iyo sag kugu sīn, agtayda ka dhaqāq ».

Fulaygī dhurwā sagārodī wahhū kū yiri:

«Na bal iga gē, na bal iga gē ».

Sagārodī bahallo kale bay u tagtay: wahh na u matarin.

Markī danbe iyado qamūnyaysan bay u tagtay dabagalle.

Isla markī ba abēsodī bay u yimādēn.

Abēsodu markay aragtay wahhay tiri:

« 'Arrabkaygu wā sag, wā sagāl madilōd, midka
ugu yar intānan sag iyo sag kugu sīn, agtayda ka
dhaqāq ».

Dabagallehī wahhū ku yiri:

« Dabodayda wā rug wā rugan rug, intān rug
iyo rug kugu sīn, sagāroda ilmohēda sī ».

Wā dirirēn :

« Sag iyo sag ... rug iyo rug ».

Abēsodī wā dhimadty: sagārodi na ilmohēdi bay
qādadty.

*Mél a ho v dōneysa nhadal v wahh ku ma
taro.*

A Q Ḏ N T A

Bareha wahhū dhahaya:

« Dadku wahhū ku kala hormarā ḍ u ku kala saramarā sida aqonta ay u kala badshā.

Aqonta si fudud lagu ma helo, ḍ dhib, dhafrid iyo murug ayay, u bāhan tahay qofka dōnahayā inū sōmaro.

Haddād dadālshān, ḍ ḥad wahh u baratān, wahhā hubāl ah in ay Sōmāliya helayso inta ay dōnayso in ay gārto ».

MAHHŪ NA TARAY BŪGGĀNI?

Būggāni wahhū na taray wahh badan.

Wahhān ka barannay sida wahh lō qoro iyo sida wahh lō akhriyo.

Wahhān ku ogānnay *afkayaga hōyo* ma'ānkīsa.

Wahhā fī'nān lahayd in qof walba ḥā Sōmāli ahī u je'elādo afkīsa hōyo sidū u je'elyahay naftīsa iyo hhigālodīsa.

Wahhān Ḵbbe ka baryaynnā inū kor u qado afkayaga hōyo, dadkayaga iyo Dalkayaga.

THE ITALIAN LINGUISTS
1889-1964

Enrico Cerulli (1898–1988)

Förra årets studenter skrev

Taariikh-nololeedka Enrico Cerulli

Enrico Cerulli wuxuu ahaa aqoonyahan Talyaanii ah. Wuxuu ku dhashay magaalada Naples ee ku taalla dalka Talyaaniga sannadkii 1898kii. Enrico Cerulli wuxuu machadka Regio Istituto Orientale ku bartay afka Itoobiyaan-Semiitiga cahdigii Francesco Gallina iyo afka Caribiga iyo cilimiga Islaamka cahdigii Carlo Alfonso Nallino iyo Giorgio Levi Della Vida. Enrico Cerulli wuxuu markii danbe noqday aqoonyahan ku xeeldheer afafka Laatiinka iyo Faransiiskii hore. Wuxuu buuggiisa qalinjabinta ee jaamacadda Neapel Federico II wax ka qoray xeer dhaqameedka Soomaalida. Enrico Cerulli wuxuu sidoo kale caan ku noqday cilmi-baadhistiisii ku saabsanayd buuggii caanka ahaa ee Kitab al-Miraaj oo laga qoray dheelmintii Nabi Muxamed(NNKHA) ee Mecka ilaa Jerusalem.

Intii u dhexeysay 1939kii ilaa 1940kii wuxuu Enrico Cerulli ahaa badhasaabka Shewa iyo Harar oo ahaa laba gobol ka tirsanaa Italian East Africa iyo guddoomiyaha xafiiska siyaasadda ee East Africa. Markii danbe taliskii dib loo soo celiyay ee Haile Selassie I aaya Qaramada Midoobay la xidhiihay sannadkii 1948kii si Enrico Cerulli iyo sagaal kale loogu dacweeyo danbiyo dagaal.

Tafatiraha taariikhdiisii oo kooban

Enrico Cerulli wuxu ku dhashay magaalada Naboli sanadku markuu ahaa 1898.

Wuxu ahaa diblamaasi siyaasadeed isla markaana dhaqammada iyo afafka geeska Afrika looga hadlo wax ka qoray.

1919kii ilaa 1925 waxa loo diray Soomaaliya si uu u noqdo xoghayaha guud ee gumaystihii Talyaaniga u qaabilansaa Soomaaliya.

1939kii ilaa 1940kii wuxu ahaa duqa magaalada labada gobol ee Shewa iyo Harrar.

Wuxunna islamarkaa madax u ahaa xafiis siyaasada oo ay lahayd wasaaradda arimaha dibada ee Talyaaniga qayteeda bariga Afrika.

1948kii wuxu boqorkii Itoobiya Xeyla Selaase ka gudbiyay in uu Cerulli galay dembi dagaal.

Ururka Qaramada Midoobay wuxu ugu yeeray Cerulli marqaati si uu uga warbixiyo eedeynta loo soo jeediyay.

Boqor Xeyla Selaase markuu ogaaday in Curelli aan dacwada lagu soo oogaynin ayuu eedeyntii la laabtay kuna bedalay in Curelli uusan weligiis cagta soo dhigin wadankiisa Itoobiya.

1950 ilaa 1954 wuxu Cerulli ka shaqaynayay qunsuliyadii Talyaaniga ay ku lahayd Iiran.

Enrico Cerulli wuxu imtixaankiisii qalinjabinta jaamacadda wax ka qoray dhaqamada Soomaaliya.

1992kii waxa lagu daabacay jaamacad Hardvard ee cariga Ingriiska qaybta daraasaadka Afrika qoraalkiisii qalinjabta jaamacadda uu ka qoray suugaanta caanka ah ee Galas Oromo.

Ugu dambayntii waxa loo magacaabay hogaamiyaha akadeemiyada Nazionale die lincei Rom.

Enrico Curelli wuxu ku dhintay magaalada Rooma sanadku makuu ahaa 1988kii.

Enrico Cerulli

Waxa uu ahaa aqoonyahan ku xeeldheer wax badanna ka qoray Geeska Africa; gaar ahaan Somalia iyo Itoobiya. Waxa uu sidoo kale u shaqeeyay maamulkii gumeystaha Talyaaniga oo uu gudoomiye gobol ka noqday goobo ay Harar iyo Shewa ka mid yihiin, isagoo sidoo kale mudo dheer u shaqeynayey Wasaarada Arrimaha Dibada ilaa heer Safiir uu ka gaaro.

Cerulli waxa uu ku dhashay ku barbaaray waxna ku bartay Magaalada Nabuli. Waxaa uu waxbarashadiisi jaamacadeed ku qaataj Machadka diraasaatka shucuubta bariga, isagoo shahaadadiisa PhD wax ka qoray "Xeerkii Soomaalidii hore". Cerulli buugaag badan ayuu ka qoray Afka iyo dhaqanka soomaaliyeed isagoo lagu tilmaami karo hormuudkii Cilmibaarista iyo aqonta Soomaaliya iyo dadka Soomaaliyeed.

Enrico Cerulli (1898-1988)

CERULLI, Enrico (wuxuu ku dhashay Naples, 15 Febraayo 1898; dhintay 1988), Oriental-Talyaani iyo diblomaasi. Intii u dhaxaysay 1950 iyo 1954 waxa uu safiir ka noqday Tehran, halkaas oo uu xiiseeyey riwaayadaha Shiicada ee (ta'zias), wakhtigaas oo si hoose loogu qaddariyo labada goobood ee dhaqanka rasmiga ah iyo kuwa diinta. Cerulli markuu yaraa wuxuu bartay luqadaha Semitic iyo Kushitic ee Itoobiya Francesco Gallina iyo cilmiga Islaamka Giorgio Levi della Vida ee Machadka Oriental ee Naples (della Vida, p. 795). Dabadeed waxa uu galay maamulkii gumaysiga, halkaas oo uu si degdeg ah u kacay, isaga oo guddoomiye ku xigeen ka noqday dalkii waagaas Talyaanigu ka talin jiray bariga Afrika isaga oo jira sagaal iyo soddon jir. Waxa kale oo uu sii watay hawshiisa cilmiyeed oo ay ku jiraan wax badan oo uu ku soo kordhiyey afafka, suugaanta, taariikhda, iyo hiddaha Itoobiya iyo Soomaaliya, iyo sidoo kale baadhitaanno ku saabsan xidhiidhka bari iyo galbeed ee qarniyadii dhexe

Barashada

Afrika.

Waxaa loo soo diray Soomaaliya 1919-kii ilaa 1925-kii (Xoghaye, waagaas madaxa siyaasadda gumeysiga), kaddibna Itoobiya 1926-kii ilaa 1928-kii (oo uu ahaa xoghaye koowaad, ka dibna la-taliyayaashii Talyaaniga); Dhanka dambe, waxa uu door muhiim ah ka qaataj saxiixii "Heshiiska Nabadda iyo Saaxiibtinimada" ee Ogosto 2, 1928 ee u dhexxeya Talyaaniga iyo Itoobiya Tafari Makonnen. 1929kii ilaa 1931 kii waxa uu ahaa wakiilka talyaaniga ee gudigii Anglo-Italian Border Commission ee Soomaaliya. Muddadaas oo dhan, waxa uu ku hawlanaa cilmi-baadhisyo qawmiyad iyo luqadeed oo labada waddan ah, kuwaas oo markaa ahaa mawduuca daabacaadda. Waxyaabihii kale waxaa ka mid ahaa, 1928/ 29-kii ayuu ka qaybqaatay daabulidii Duke of Abruzzi ilaa ilaha Shabeelle.

